

Kusocota waalidiinta caruurta 3 ilaa 5 sano jirka ah...

Ma ogtahay...

In Kooxda baaritaanka dhallaanka ee Dugsiyada Dadweynaha ee Green Bay ay bixiyaan adeeg baaritaan xagga koriinka dhallaanka oo ay siiyaan waalidiinta caruurta yaryar ee kunool xuduudaha degmada. Baaritaanka korriinka waxa lagu hubinayaa korriinka guud ee ilmaha wuxuuna go'aaminayaa haddii uu ilmuhu u baahanyahay baaritaano dheeraad ah ama adeegyo kahor waxbarashada kindergartenka. Baaritaano hormarineed oo dhowr ah ayaa goobo badan oo bulshada laga heli karaa sanadkan.



Halkan hoose waxa ku qoran taariikhaha iyo goobaha baaritaanada soo socda:

Taariikhda

Talaada, 10/23/2018	8:30 - 11:30 a.m.
Arbaca, 11/14/2018	8:30 - 11:30 a.m.
Qamiis, 12/20/2018	8:30 - 11:30 a.m.
Jimca, 01/04/2019	8:30 - 11:30 a.m.
Talaada, 02/12/2019	8:30 - 11:30 a.m.
Jimca, 03/08/2019	8:30 - 11:30 a.m.
Jimca, 04/12/2019	8:30 - 11:30 a.m.

Goobta

Xarunta bulshada ee Howe
526 S. Monroe Ave.
Xarunta waalidka ee Head Start
617 N. Irwin St.
Xarunta lagu magacaabo Kroc Center
1315 Lime Kiln Rd.
Xarunta kheyradka bulshada ee Howe
Community Resource Center
526 S. Monroe Ave.
Xarunta lagu magacaabo Family and
Childcare Resources of NEW
201 W. Walnut St.
Xarunta waalidka ee Head Start
617 N. Irwin St.
Dukaanka Salvation Army
626 Union Ct.

Haddii aad daneyneysid in ilmahaaga ka qeybgalo baaritaanka korriinka, fadlan la xiriir oo balan ka sameyso adiga oo wacaya lambarka ah 920-448-2102. Baaritaanka waa in balan aad sameysatid.

Halkan hoose waxa ku qoran waxyaabo ay tahay inaad ka fiirisid ilmahaaga:

Ilmaha marka uu jiro 3, inta badan:

- Waay fahmaan qoyska 75%
- Kuhadlaan jumlado gaaban
- Ka jawaaban su'alo sahlan
- Waay fahmaan waxyaabaha badankooda loo sheego
- Waxay jecelyihiin dhageysiga buugaagta sheekada
- Waxay bilaabaan la ciyaaridda caruurta kale
- Waxay xiiseyaan caawinta dadka waweyn
- Waxay isku aadiyaan midibada asaasiga ah
- Waay labistaan iyadoo la caawinayo
- Waay fuulaan oo kasoo dagaan jaraanjarta iyagoo tillaabo marbo qaadayo
- Kaxeeyaan bushkuleeti 3 lugoodle ah
- Wax kujaraan maqas yar
- Waxay leymo ku sawiraan waraaq

Ilmaha marka uu jiro 4, inta badan:

- Si fasiix ayuu u hadlaa; waana la fahmaa inta badan
- Waay hadlaan marka ay muujinayaan dareenkooda
- Su'aalo badan ayaay weydiiyaan ayagoo dalbado jawaabo
- Waxaay kaqeybqaataan ciyaaraha soo noqnoqda
- Waxay ka hadlaan sawirada buug
- Waxay ka helaan la ciyaarta caruurta
- Waxay tilmaami karaan ugu yaraan afar midibood
- Waxay qaban karaan kubbad weyn oo iyaga lagu tuuro
- Waxay garanayaan magacooda oo buuxa, da'dooda iyo jinsigooda
- Maqas ayaay warqad ku jari karaan
- Horey waay ooga boodi karaan shey
- Waxay sawiri karaan wareeg
- Tirin karaan ilaa 10 iyo 1,2, ama 3 sheey



**Green Bay Area
Public School District**
Engagement. Equity. Excellence.

200 S. Broadway St. | Green Bay, WI
920-448-2000 | www.gbaps.org